Finland dadku way siman yihiin

Warar loogu talagalay dumarka iyo ragga waddanka u soo guurey



SISÄASIAINMINISTERIÖ
WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

VÄHEMMISTÖVALTUUTETTU
WAKIILKA DADKA LAGA TIRADA BADAN YAHAY

TASA-ARVOVALTUUTETUN TOIMISTO
XAFIISKA WAKIILKA SINAANTA

Qoraalkan waxaa lagu sheegayaa waxyaabo ku saabsan

Bulshada Finnishka 3

Jagada sinaanta ee dumarka iyo ragga ee nolosha qoyska 5

Nolosha wanaagsan ee ilmaha 9

Sida caawimo loogu helo dhibaatooyinka qoyska iyo dhallinyarada 11

Waxbarashada iyo nolosha shaqada 17

Ka ganacsiga dadka 21

Hay'adaha dowladda ee muhiimka ah 22

Cusboonaysiinta qoraalka: Juhani Sippola
Kooxda shaqada: Leena-Maija Qvist, wasaaradda arrimaha gudaha
Pirjo Kruskopf, xafiiska wakiilka dadka laga tirada badan yahay iyo
Minna Lundell-Kiuru, Xafiiska wakiilka sinnaanta
Habaynta iyo daabacaadda: Edita Prima Oy, Helsinki 2010

Qoraalka waxaa loo turjumey luuqadahan soo socda: Albaaniyaan, Carabi, Dari, Ingiriis, Kurdi (Sorani), Farsi, Soomaali, Finnish, Tagalog, Thailand, Ruush iyo Fiitnaam

Warar ku saabsan bulshada Finnishka

Dumarka iyo ragga u soo guurey Finland iyo qoysaskooda waxaa qoraalkan loogu sheegayaa warar aasaasi ah oo ku saabsan nolosha qoyska, barbaarinta carruurta, waxbarashada iyo nolosha shaqada.

Xuquuqda ah in dadka si isu dhiganta loola dhaqmo

Sharciyadu waxay dhigayaan in Finland gudeheeda dadka oo dhan xaq u leeyihiin in si isu dhiganta loola wada dhaqmo. Sharciga dhigaya in si isu dhiganta dadka oo dhan loola dhaqmo (Yhdenvertaisuuslaki) ayaa mabnuucaya takooridda ku salaysan da'da, meesha laga soo jeedo asal iyo dhalasho ahaan, dhalasho waddan, luuqad, diin, waxa la aaminsan yahay, fikrad, xaalad caafimaad, naafonimo (vammaisuus) iyo weliba siduu qofku lab ama dheddig ahaan u jihaysan yahay (sukupuolinen suuntautuminen). Sharciga dhigaya in si isu dhiganta dadka loola wada dhaqmo waxaa ku dhaqankiisa si aad ah loo isticimaalaa tusaale ahaan, marka qof ama dad loo qaadanayo shaqo, arrimaha waxbarashada iyo arrimaha la xiriira helitaanka adeegyada arrimaha bulshada iyo caafimaadka. Sharciga dhigaya inay dadku siman yihiin ayaa mabnuucaya takooridda ku salaysan qofku lab ama dheddig mid kuu yahay. Waxaa kaloo iyana mabnuuc ah takooridda ku salaysan uurka, ummulidda, waalidnimada ama waajibaadka daryeelidda qoyska. Ujeedada laga leeyahay sharciga dhigaya inay dadku siman yihiin waa in kor loo sii qaado siday dumarka iyo raggu ugu siman yihiin nolosha shaqada, mushaharka, waxbarashada, sidii nolosha shaqada iyo qoyska looga dhigi lahaa kuwo la isku wadi karo iyo weliba nolosha bulshada oo dhan.

Adeegyada dowliga ah

Adeegyada dowliga ah waxaa ka mid ah adeegyada aasaasiga ah ee dadka, kuwa ugu muhiimsanna waxay la xiriiraan daryeelka

caafimaadka iyo arrimaha bulshada, hawlaha waxbarashada iyo aqoonta, deegaanka inagu wareegsan iyo weliba daryeelka wadooyinka iyo boosaneerooyinka biyaha. Adeegyadan la soo sheegay qabanqaabintooda waxaa u xilsaaran degmooyinka (kunnat). Qaranku (valtio) wuxuu u xilsaaran yahay adeeyada dowliga ah ee ah tusaale ahaan sida booliska, xafiisyada shaqada iyo xoogsashada (työ- ja elinkeinotoimistot) iyo hay'adaha badbaadada shaqaalaha (työsuojeluviranomaiset). Waddanka Finland wuxuu leeyahay maamul garsoorka ah (oikeuslaitos) oo aan cidna u eexan oo siyaasad ahaan ka madaxbannaan qolyaha go'aamada gaara. Ururada shacabka ayaa iyana bixiya adeegyo dhammaystira adeegyada dowliga ah.

Xuquuqaha aasaasiga ah ee dadka waddanku leeyihiin

Waxyaabaha xuquuqaha aasaasiga ah ee dadka waddanku leeyihiin waxaa ka mid ah xuquuqda codaynta, xornimo diimeed (uskonnonvapaus), xornimo fikradeed, xornimo isu soo ururid iyo xornimo hadal, sir warqad (kirjesalaisuus), carruurta xuquuqdooda iyo weliba xuquuq ah in la helo deegaan waxbarasho oo sinaan leh. Qofku meesha uu doono ayuu dooran karaa inuu Finland kaga noolaado, xor buuna u yahay inuu waddanka gudihiisa meeshuu doono mari karo. Qaranka (valtio) iyo degmada uu qofku ku nool yahay (asuinkunta) waxay u xilsaaran yihiin inay haddii loo baahdo sugaan inuu qofku helo nolol qiimo biniaadanimo leh.

➤ KA GANACSIGA DADKU WAA DEMBI CIQAABTIISU DARAN TAHAY

Ka ganacsiga dadka waxaa la isku dayaa in qofka dhibanaha ah looga faa'iideysto si wasmo ahaan ah iyo/ ama si dhaqaale ahaan ah. Faahfaahin dheeraad ah oo mawduucan ku saabsan waxay ku qoran tahay bogga 21.

➤ TURJUBAANID

Haddii luuqadda aad taqaan aanay kugu filnayn inaad danahaaga kagala hadasho shaqaalaha dowlada, qofka shaqaalaha waxaad weydiin kartaa inay suuragal tahay in turjubaan la isticimaalo. Ma aha in carruurta loo isticimaalo turjubaan ahaan.

Nolosha qoyska dhexdiisa ah naagta iyo ninku way siman yihiin

Labada qof ee isqaba xuquuqda ay leeyihiin waa isku mid, waxaana saaran waajibaadyo isku mid ah. Xiriirka wada socoshada iyo isguursashaduba waxay waddanka Finland ku salaysan yihiin inay labada qof iyagu israbaan. Dumarka iyo ragguba iskood bay u dooran karaan qofkay rabaan. Waalidku go'aan kama gaaraan carruurta guurkooda iyo dadkay carruurtu guursanayaan.

Noocyo badan oo qoysas ah

Qoyska caadiga ah ee Finnishka ah wuxuu ka kooban yahay aabbe, hooyo iyo carruurtuu qoysku leeyahay. Sababtaas darteed sida caadiga ah qoysaska dadkoodu ma badna.

Waxaa kaloo qoys noqon kara nin iyo naag wada nool iyagoon isguursan. Markaas ninka iyo naagtu waxay u wada nool yihiin sidii wax isqaba oo kale (avoliitto). Sidoo kale waddanka Finland labo nin ama labo naagood way u wada noolaan karaan sidii wax isqaba oo kale (avoliitto), ama xiriirkooda ayey diwaangelin karaa. Xaas ahaan (Puolisot) waxaa loola jeedaa labada qof ee wada nool ee isqaba, ama xiriirkooda diwaangeliyey, ama aan isqabin laakiin u wada nool sidii wax isqaba oo kale.

Sida Finland la isugu guursado

Finland waxaa la isguursadaa iyadoo kaniisadda la isku mehersado ama iyadoo si shicib ahaan ah la isugu mehersado tusaale ahaan xafiiska diwaangelinta (maistaraatti). Meherka ka hor waxaa la baaraa, inay jiraan waxyaabo horistaagi kara isguursashada.

Baaritaanka waxaa samayn kara xafiiska diwaangelinta ama beesha diinta (seurakunta) ee labada qof ee isguursanayaa xubnaha ka yihiin, ama midkood xubin ka yahay. Siduu sharciga Finland dhigayo, qofku ma guursan karo, haddii ay weli qof kale isqabaan.

Sidoo kale hadday qofka da'diisu ka yar tahay 18 sano ama labada qof ee isguursanayaa qaraabo isu dhow yihiin, waxaa loo arkaa inay yihiin waxyaabo horistaagaya isguursashada. Marka la baarayo inay jiraan waxyaabo horistaagaya isguursashada, waxaa la raacaa sharciga Finland, haddii labada qof ee raba inay isguursadaan ugu yaraan midkood leeyahay dhalashada Finland ama uu deggen yahay Finland.

Ismehersashada ka hor ayey labada qof ee isguursanayaa go'aan ka gaarayaan magaca qoyska (sukunimi) ee ay qaadan doonaan. Siduu sharciga Finland dhigayo, waxay samayn karaan in labada qof mid walba haysan karo magaciisii hore ee qoyska, ama labadooda magac ee qoyska ayey mid ahaan qaadanayaan oo magacaas ayaa labadoodaba u noqonaya magaca qoyska. Waxay kaloo magac qoys ahaan u qaadan karaan labadooda magac ee qoyska oo la isku qabtay.

Ilamaha dhasha iyadoo la isqabo, iyadoo aan wax kale la samayn ayaa waxaa toos aabbe ugu noqda ninka qaba naagta ilmaha dhashay. Carruurta dhalata iyadoo aan la isqabin, qofka aabbaha u ah waa in la sharcigeliyaa, iyadoo loo tegayo shaqaalaha degmada u qaabilsan ilaalinta arrimaha carruurta (lastenvalvoja). In ilmaha aabbihii la ogaado waxaa lagu sugayaa xuquuqda uu ilmuhu leeyahay, tusaale ahaan sida qaybinta dhaxalka.

Xuquuq isku mid ah iyo waajibaad isku mid ah

Siduu dhigayo sharciga Finland labada qof ee isqabaa waxay leeyihiin xuquuq isku mid ah, waajibaadka saaranna waa isku mid. Labada qof ee xaaska isu ah labadooduba way shaqaysan karaan, sidaas bayna uga qaybqaadan karaan qoyska masruufkiisa. Haddii labada qof ee xaaska isu ah midkood aanu shaqayn, hawsha guriga ayuu qabanayaa oo sidaas buu uga qaybqaadanayaa daryeelka qoyska. Qofka shaqeeya ama ka lacagta badan soo gasho waa inuu qofka ay xaaska isu yihiin siiyaa lacagta loo isticimaalayo waxyaabaha loogu baahan yahay guriga ka dhexeeya iyo lacag

uu u isticimaalo waxyaabaha caadiga ah ee uu shakhsi ahaan ugu baahan yahay. Haddii kan lacagta badan soo gasho sidaas ogolaan waayo, waxaa la awoodaa in waajib lagaga dhigo inuu qofka kale siiyo caawimo masruuf (elatusapu).

Labada qof ee xaaska isu ah mid waliba isagaa u taliya hantidiisa

Labada qof ee xaaska isu ah mid waliba isagaa u taliya hantidiisa. Siduu sharcigu dhigayo, labada qof ee xaaska isu ah mid waliba isagaa iska leh hantida uu intaanu guursan ka hor lahaa, ama hantida uu iskiis u keensado wakhtiga ay isqabaan. Laakiin labada qof ee xaaska isu ah midkoodna isagoo aan kan kale ogolaansho ka haysan ma iibin karo ama cid ma siin karo, tusaale ahaan guriga loogu talagalay inay ku wada noolaadaan, ama qalabka guriga iyo carruurta alaabtooda.

Haddii labada qof ee xaaska isu ah midkood keligii deyn qaato, deynka bixintiisa keligii baa masuul ka ah. Deynka ay wadagalaan ama deynka midkood u galo si uu qoyska u masruufo, labada qof ee xaaska isu ah masuul bay ka wada yihiin.

Sharciga loo isticimaalayo hantida

Labada qof ee xaaska isu ah hantidoodu siday noqonayso sharciga loo isticimaalayaa sida caadiga ah waa sharciga ka jira waddanka labada qof markay isguursadaan u noqda deegaanka gurigoodu ku yaallo ee ay deggayaan. Haddii Labada qof ee xaaska isu ah ay marka dambe waddan kale deggaan, waddankaas sharcigiisa ayaa la isticimaalayaa.

Hase yeeshee sida caadiga ah waddanka cusub ee u noqda waddankooda, sharcigiisa waxaa la isticimaalaa markay labada qof ee xaaska isu ah waddankaas deggenaayeen ugu yaraan shan sannadood.

Haddii labada qof ee xaaska isu ah markay isguursadaan si joogto ah u deggaan Finland, sharciga Finland siduu dhigayo ayey isguursashadu saamayn ugu yeelanaysaa hantida. Haddii labada qof ee xaaska isu ah ay markii hore meel kale deggenaayeen, oo ay Finland u soo guuraan, sharciga Finland waxaa la isticimaalyaa markay shan sannadood halkan deggenaadaan ka dib. Wixii intaas ka horeeya waxaa la isticimaalayaa sharciga ka jira meeshay labada qof ee xaaska isu ah markii hore deggenaan jireen. Laakiin hadday yihiin dad waddanka dib ugu soo guurey, isla markay labada qof ee xaaska isu ah si joogto ah Finland u deggaan, ayey ka bilaabanaysaa in sharciga Finland la isticimaalo.

Heshiiska ku saabsan qaybinta hantida

Iyagoo gelaya heshiis qoraal ah ayey labada qof ee xaaska isu ah waxay awoodaan inay ku heshiiyaan, in hantida sida guurka loogu qaybsanayo loo isticimaalo tusaale ahaan sharciga ka jira waddankoodii hore ama waddankay hore u deggenaayeen sharcigiisa. Labada qof ee xaaska isu ah ee Finland u soo guuraa waxay ku heshiin karaan, in hantida sida guurka loogu qaybsanayo loo isticimaalo sharciga Finland, xitaa iyagoon weli Finland deggeneyn shan sannadood. Inta badan waxaa wanaagsan, in xafiiska dowladda ee caawinta arrimaha maxakamadaha (oikeusaputoimisto) ama qareemada kale (looyar) laga codsado inay ka caawiyaan sida heshiiska loo samaynayo.

Xaq u yeelashada dhaxalka

Waddanka Finland dumarka iyo raggu isku si bay hantida u dhaxlaan. Markay waalidku dhintaan, carruurta iyo dadkay iyagu sii dhaleenba waxay xaq u leeyihiin inay dhaxlaan hantida waalidku ka dhintay. Labada qof ee isqaba markuu midkood dhinto, haddii kan dhintay aanu lahayn carruur uu isagu dhalay ama carruurtiisu waxay sii dhaleen, markaas qofka dhintay hantidiisa oo dhan waxaa dhaxla qofka ay isqabeen ee nool.

Hase yeeshee sharcigani ma fulayo, haddii qofka xaaska ahaa ee dhintay uu ka tegey dardaaran qoraal ah oo dhaxalka ku saabsan (testamentti), oo uu ku go'aamiyey sida hantidiisa loo dhaxlayo. Qofku hadduu sameeyo qoraal ku saabsan sida loo dhaxlayo (dardaaran qoraal ah oo dhaxalka ah = testamentti), saamayn buu ku yeelan karaa sida hantidiisa loo qaybsanayo, markuu dhinto ka dib.

Xagga helitaanka dhaxalka, qofka waddanka u soo guurey wuxuu sida caadiga ah leeyahay xuquuq la mid ah tan qofka dhalashada Finland leh. Dhaxalka marka la qaybinayo waxaa mudnaanta koowaad la siiyaa oo lagu dhaqmaa sharciga ka jira waddanka uu qofka dhintay ee la dhaxlayaa si sharci ah u deggenaa. Sidoo kale dardaaranka qoraalka ah ee dhaxalka ku saabsan (testamentti) baa lagu go'aamin karaa sharciga la isticimaalayo marka dhaxalka la qaybinayo.

Xafiisyada dowladda ee caawinta arrimaha maxakamadaha (oikeusaputoimistot) iyo qareemada kale (looyar) ayaa laga helaa caawimo ku saabsan sida dhaxalka loo qaybsado iyo sida loo sameeyo dardaaranka qoraalka ah ee dhaxalka (testamentti).

Siday u kala duwan yihiin isqabidda iyo isqabid ahaan oo kale u wada noolaanshuhu

Isqabid ahaan oo kale u wada noolaanshaha (avoliitto) waxaa loola jeedaa markay labada qof ee xaaska isu ah, iyagoo aan isqabin guri ku wada nool yihiin. Isqabid ahaan oo kale u wada noolaanshaha inta badan waxaa loo arkaa inay u dhiganto isqabidda (avioliitto), tusaale ahaan marka la gaarayo qaar badan oo ka mid ah go'aamada ku saabsan arrimaha badbaadada bulshada (sosiaaliturva). Marka sidii wax isqaba oo kale loo wada nool yahay, laakiin aan la isqabin waxaa muhiim ah in lagu heshiiyo sidii loo qaybsan lahaa hantida labada qof ka dhaxaysa, haddii la kala tago ama labada qof midkood dhinto. Waa in qoraal ahaan loo sameeyaa heshiisyada khuseeya waxyaabaha hantida ah.

Siduu sharciga Finland dhigayo, u wada noolaanshaha sidii wax isqaba oo kale waxay isqabidda kaga duwan tahay, tusaale ahaan siyaabahan soo socda:

- Labada qof ee sidii wax isqaba oo kale u wada nool carruurta ay isu dhalaan si otomaatig ah uma helaan jagada xuquuqda ee ay carruurta dadka isqabaa isu dhaleen helaan, ee xuquuqdooda waxaa la sugaa iyadoo aabbanimada sharci ahaan loo ansixinayo (isyyden vahvistaminen).
- Haddii labada qof ee sidii wax isqaba oo kale u wada nool kala guuraan, mid waliba hantidiisa isagaa lahaanaya, haddii aanu jirin heshiis la galay oo arrinta ku saabsan.
- Labada qof ee sidii wax isqaba oo kale u wada nool isma dhaxlaan, haddii aanay lahayn dardaaran qoraal ah oo dhaxalka ku saabsan (kirjallinen testamentti).

Sidii wax isqaba oo kale u wada noolaanshuhu way noqon kartaa sabab qofka loogu ogolaan karo sharci uu waddanka ku deggenaado. Shaqaalaha dowladu qof walba arrintiisa si gaar ah bay uga fekeraan, in wada noolaanshaha sharci loogu ogolaan karo iyo in kale.

Qorshaynta qoyska iyo la talinta ka hortagga uurka

Qorshaynta qoyska iyo la talinta ka hortagga uurka waxaa laga helaa rugaha caafimaadka. Qalabka ka hortagga uurka ee ragga loogu talagalay waxaa laga soo gadan karaa tusaale ahaan dukaamada cuntada iyo farmashiyada. Hababka uurka lagaga hortago ee dumarka loogu talagalay waxaa lagala sheekaysan karaa oo warar faahfaahsan oo ku saabsan laga heli karaa rugaha caafimaadka, tusaale ahaan mararka dhakhtarka lala kulmayo.

Naagtu inay uur leedahay waxay ku hubsan kartaa iyadoo tijaabada uurka lagu ogaado lagaga qaadayo rugta caafimaadka, ama iyadoo

Doorashada magaca qoysku waxay kaloo saamaynaysaa magaca qoyska ee carruurta

DOORASHADA 1

Labada qof ee isqabaa waxay magac qoys ahaan u qaadan karaan magaca qoyska ee ninka ama kan qoyska ee naagta. Labada qof ee isqaba kan magaca qoyskiisu isbeddelo wuxuu isticimaali karaa magaciisii hore ee qoyska iyo kan cusub ee qoyska oo la isku qabtay oo isdaba yaal.

Markay sidan jirto carruurtu waxay qaadanayaan magaca qoyska ee waalidkood.

DOORASHADA 2

Labda qof ee isqaba mid waliba magaca qoyskiisa ayuu haysanayaa.

Markay sidan jirto waalidka ayaa dooranaya magaca qoyska ee ay carruurtu qaadanayaa inuu noqdo magaca qoyska ee aabbaha ama kan hooyada. Carruurta isku hooyada iyo isku aabbaha ah oo dhan waa inay lahaadaan magac qoys oo isku mid ah.

isticimaalaysa qalabka uurka lagu ogaado ee farmashiyaha lagu gado ayey iskeed u samaynay kartaa tijaabada uurka lagu ogaado.

Dumarka waxaa lagula taliyaa inay u wanaagsan tahay inay markuu wakhti go'an oo joogto ah ka soo wareegaba maraan baaritaan oo ay la kulmaan dhakhtarka cudurada dumarka. Dumarku hadday rabaan waxay sida caadiga ah heli karaan in dhakhtarka ay u tegayaan noqdo dhakhtarad dumar ah.

Joojinta uurka

Marka wasmada la sameeyo ka dib uurka daawada lagu joojiyo waxaa lagu magacaabaa ka hortagga dambe ee uurka (jälkiehkäisy). Waxyaabaha sida caadiga ah sababta u ah in la sameeyo ka hortagga dambe ee uurka waa wixii ka hortagga uurka loo isticimaalay oo sidii la rabey aan noqon ama kufsasho. Qofka ka weyn 15 sano iyadoo aanu dhakhtar u soo qorin buu farmashiyaha ka heli karaa kiniinka ka hortagga dambe ee uurka (jälkiehkäisytabletit). Waddanka Finland in uurka la joojiyo oo uurka la soo rido (aborshan) waa suuragal, laakiin shuruudo ayey ku xiran tahay. In uurka la joojiyo waxaa la samayn karaa, haddii dhallidda ilmuhu ay khatar u tahay naagta caafimaadkeeda, ama haddii uurka iyo dhallidda ilmuhu culays aad u weyn u keenayaan naagta nolosheeda.

Naagtu hadday ka yar tahay 17 sano ama ka weyn tahay 40 sano, mar walba oo ay rabto way heshaa in uurka laga soo rido (aboorshan lagu sameeyo). Marka uurka loo joojinayo sabab sooshal ahaan, waa in uurka la joojiyaa inta lagu jiro uurka 12 todobaad ee ugu horeeya.

Waddanka Finland marka uurka la joojinayo (aboorshanka la samaynayo) mar walba waxaa loo baahan yahay inay naagta uurka leh raalli ka tahay. Naagtu hadday ka fekereyso aboorshan, waa inay sida ugu dhakhsaha badan ula xiriirtaa dhakhtar.

Taageerada wakhtiga uurka

Waa muhiim inay hooyada uurka leh marto baaritaan caafimaad. Hooyada iyo ilmaha aan weli dhalan wanaaga daryeelkooda waxaa loogu deeqaa adeegyo dhakhtar oo lacag la'aan ah iyo u tababar dhalitaanka ah oo laga helo rugaha daryeelka hooyada iyo dhallaanka (äitiys- ja lastenneuvolat).

Hooyada uurka leh waa inay uurka bishiisa afraad inta aanay dhammaan ka hor, tagtaa rugta daryeelka caafimaadka hooyada iyo dhallaanka ama u tagtaa dhakhtar. Caawimada hooyonimada (äitiysavustus) waxaa keliya oo xaq u leh hooyooyinka wakhtigii loogu talagalay ku maray baaritaanka caafimaadka.

Imaatinka joogtada ah ee ay hooyada uurka leh imaanayso rugta daryeelka hooyada iyo dhallaanka ayaa inta lagu jiro wakhtiga uurka, lagula socdaa xaaladda caafimaadka ee hooyada iyo ilmaha. Ka danaysiga rugta daryeelka hooyada iyo dhallaanku waa lacag la'aan.

Aabbayaashuna way ka qaybqaadan karaan tegitaannada la tegayo rugta daryeelka hooyada iyo dhallaanka ee ah marka waalidka loo sii tababarayo ilmaha dhalashadiisa.

Waddanka Finland isbitaal baa lagu dhashaa. Aabbayaashu goobjoog way noqon karaa markuu ilmuhu dhalanayo. Wayna jirtaa inay aabbayaal badan rabaan inay hooyada umulaysa taageeraan oo la joogaan markuu ilmuhu dhalanayo.

Guriga hore

Uurka aan la fileyn iyo ilmaha dhalashadiisu waxay keeni karaa dhibaatooyin, gaar ahaan hooyadu hadday aad dhallinyaro u tahay, ama haddii ilmaha dhashay hooyadii iyo aabbihii aanay isqabin, ama haddii midkood aanu rabin inay isguursadaan. Xaaladda noocaas ah markay jirto hooyada ama hooyada iyo ilmaha yar ee dhashay waxay aadi karaan guriga hore (ensikoti). Haddii loo baahdo aabbuhuna xitaa wuu deggenaan karaa guriga hore.

Sida caadiga ah hooyada iyo ilmuhu waxay guriga hore deggenaadaan sannad barkiis (lix bilood). Guriga hore markay joogto hooyada waxaa la baraa waxyaabaha la xiriira hooyonimada iyo sida ilmaha loo daryeelo. Guriga hore waxaa kaloo dadka lagu baraa waalidnimada. Guryaha hore (ensikodit) waxaa laga helaa wararka ku saabsan xafiiska sooshalka ee degmada iyo rugta daryeelka hooyada iyo dhallaanka.

Markuu ilmuhu dhasho ka dib, fasaxa hooyonimada iyo aabbanimada

Markuu ilmuhu dhasho ka dib waalidku waxay xaq u leeyihiin fasaxyada qoyska ee sharcigu dhigayo. Fasaxyadaas kuwa ugu muhiimsan waxaa

ka mid ah fasaxa hooyonimada oo loogu talagalay hooyada iyo fasaxa aabbanimada oo loogu talagalay aabbaha. Fasaxa hooyonimada ka dib aabbaha ama hooyada midkood baa qaadan kara fasaxa waalidka, ama waalidku inay wadaagaan bay u isticimaali karaan fasaxa waalidka.

Sharcigu wuxuu dhigayaa inay hooyadu xaq u leedahay fasaxa hooyonimada oo ah 105 maalmood oo ah maalmaha shaqada. Wakhtiga lagu jiro fasaxa hooyonimada iyo fasaxa aabbanimada iyo fasaxa waalidka waxaa qofka fasaxa ku jira la siiyaa lacag.

Fasaxa hooyonimada qayb ka mid ah waxaa la isticimaalaa intaan la gaarin wakhtiga lagu qiyaasay inuu ilmuhu dhalanayo, inta soo hartana waxaa la isticimaalaa markuu ilmuhu dhasho ka dib. Xaq u yeelashada fasaxa hooyonimada waxaa shuruud u ah, in wakhtiga ilmuhu inuu dhasho lagu qiyaasay ka hor ay hooyadu Finland deggeneyd ugu yaraan 180 maalmood. Waxaa kaloo shuruud ah in wakhtiga hooyadu uurka leedahay gaaro ugu yaraan 154 maalmood.

Faahfaahimo dheeraad ah oo ku saabsan fasaxyada hooyonimada, aabbanimada iyo fasaxa waalidka iyo weliba fasaxyada kale ee qoyska waxaa laga helaa rugaha daryeelka hoyyada iyo dhallaanka iyo degmada la deggan yahay xafiiskeeda Hay'adda Hawlgabka Qaranka (Kela).

Nolosha wanaagsan ee ilmaha

Finland waxay ballanqaaday inay dhowrto heshiiska xuquuqda carruurta ee Qaramada Midoobey. Heshiisku wuxuu dhigayaa, in ilmaha carruurta ah uu xaq u leeyahay badbaado iyo daryeel khaas ah, iyo qayb ku filan oo ka mid ah bulshadu waxay haysato, wuxuu kaloo ilmuhu xaq u leeyahay inuu si u dhiganta da'diisa iyo heerka horumarka koriinkiisa uga qaybqaato waxyaabaha isaga khuseeya go'aan ka gaaridooda.

Waddanka Finland gabdhaha iyo wiilashu waxay leeyihiin xuquq isku mid ah. In ilmaha la garaaco ama si kale oo jir ahaaneed loo edbiyo lama ogola oo sharciga Finland baa diidaya.

Bulshadu (dowladu) waalidka way kala qaybqaadataa daryeelka caafimaadka ee ilmaha. Markuu dhasho laga bilaabo ilaa uu uu ka gaarayo todobo iyo toban sano, ilmaha wanaagiisa nolosha waxaa la socda rugta daryeelka hooyada iyo dhallaanka (äitiys- ja lastenneuvola).

Meeshaas ayaa ilmaha caafimaadkiisa si joogto ah ugu samaysa baaritaan la sameeyo marar ay wakhtiyo go'an oo joogto ah u dhexeeyaan. Rugta daryeelka hooyada iyo dhallaanka ayaa ilmaha lagu siiyaa tallaalada loo baahan yahay, waxaa kaloo rugtaas laga helaa aqoonta loo baahan yahay ee la xiriirta ilmaha dhaqaalayntiisa, barbaarintiisa iyo waalidnimada.

Carruurta da'da iskuulka ah wanaaga noloshooda waxaa ka warhaya oo iyagoo waalidka wadashaqayn la leh la socda kalkaaliyaha daryeelka caafimaadka ee iskuulka, dhakhtarka iyo dhakhtarka ilkaha ee iskuulka.

Taageerada dhaqaale ee la siiyo qoysaska carruurta leh

Iyadoo la kaashanayo taageerooyin dhaqaale oo kala duduwan ayaa qoysaska carruurta leh loo fududeeyaa inay helaan dhaqaale ay ku noolaadaan. Waxyaabaha faa'iidooyinka ah ee la isa siiyo qaarkood waa kuwo qoys walba oo Finland deggan leeyahay. Taageerooyinka qaarkood helitaankoodu waxay ku xiran tahay inuu qoysku Finland deggenaa ilaa wakhti loogu talagalay.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan faa'iidooyin (taageerooyinka dhaqaale) ee qoysaska

carruurta leh la siiyo, waxaa laga helaa xafiisyada ay leedahay Hay'adda Hawlgabka Qaranka (KELA), oo ah xafiisyada taageerooyinkaas laga dalban karo. Wararka ku saabsan wakhtiga la dalban karo taageerda waxaa kaloo laga helaa rugta daryeelka hooyada iyo dhallaanka ee xarunta caafimaadka ee degmada la deggan yahay.

Daryeelka ilmaha

Carruurta aan da'da iskuulka gaarin waxaa haddii loo baahdo maalintii lagu hayn karaa meel aan guriga ahayn oo ah xannaano ama waxaa hayn kara qof shaqaale ah oo guriga oo isagu deggen yahay ku haya carruurta (perhepäivähoito). Xannaanada waxaa jooga dad shaqaale ah oo shaqada la soo baray. Sidoo kale dadka shaqaalaha ah ee gurigooda carruurta ku hayaa waa dad soo bartay shaqadan.

Xannaano maalmeedka degmadu leedahay ama tan birifaatiga ah waxay taageereysaa siduu ilmaha horumarkiisa koriinku u noqon lahaa mid dheellitiran oo dhinacyo badan leh. Xannaano maalmeedka jirta ayaa waxay suuragelineysaa inay hooyooyinka iyo aabbayaashu si isu dhiganta uga qaybgeli karaan waxbarasho ama uga soo shaqaysan karaan shaqo guriga bannaankiisa ah.

Kharashka xannaano maalmeedku wuxuu ku xiran yahay dakhliga qoyska soo gala. Qoysaska dakhliga soo galaa yar yahay, xannaano maalmeedku lacag la'aan bay u tahay. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan xannaano maalmeedka carruurta waxaa laga helaa meelaha wararka laga helo ee degmooyinku leeyihiin. Wararka ku saabsan noocyada taageerada haynta carruurta waxaa la weydiin karaa xafiiska Hay'adda Hawlgabka Qaranka (KELA) ee meesha la deggen yahay ku yaalla.

Hooyada ama aabbaha midkood baa shaqada ka qaadan kara fasax mushahar la'aan ah oo la yiraahdo fasaxa haynta ilmaha, oo ilmaha guriga ku hayn kara. Waalidka ilmaha guriga ku haya dhaqaale ahaan waa la taageeraa oo ilaa ay ilmaha saddex sano uga buuxsamayso waxaa la siiyaa lacagta guri ku haynta ilmaha (kotihoidon tuki).

Waajibaadka waxbarashadu wuu saameeyaa gabdhaha iyo wiilashaba

Waddanka Finland gabdhaha iyo wiilasha si isku qiimo ah oo siman bay suuragal ugu tahay inay iskuul dhigtaan oo waxbartaan.

Carruurta sida joogtada ah Finland u deggan oo dhan waxaa saameeya waajibaadka guud ee waxbarasho (yleinen oppivelvollisuus). Taas macneheedu waa carruurta waddanka u soo guurtey xitaa waa inay sameeyaan waxbarashada dugsiga hoose/dhexe oo 9 sannadood ah.

Carruurtu intaanay iskuulka bilaabin ka hor waxay ka qaybqaadan karaan waxbarasho hore (esiopetus) oo lagu qaato xannaanada ama iskuulka. Sannadka ay 7 sano u buuxsamayso ayuu ilmuhu sida caadiga ah bilaabaa dugsiga hoose/dhexe.

Waxbarashada aasaasiga ah iyo qalabka la xiriira ee wax laga barto, cuntada iskuulka iyo daryeelka caafimaadku waa lacag la'aan. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan arrimaha la xiriira iskuuldhigashada waxaa laga helaa degmada aad deggen tahay gudeenkeeda waxbarasho iyo shaqaalaha iskuullada ka shaqeeya.

Dugsiga hoose/dhexe ee sagaalka sano ah ka dib sida ugu caadisan ee waxbarashada loo sii wataa waa, in la galo dugsi sare oo ah meesha laga helo cilmiga aqoonta guud, ama waxaa la geli karaa macad xirfad lagu barto. Ka dibna waxbarashada waxaa laga sii wadan karaa meel tacliinta sare ah oo ah macadka sare ee xirfadda (ammattikorkeakoulu) ama jaamacad (yliopisto).

Ilmaha muhiim bay u tahay inuu hal af si fiican u yaqaan

Dhaqamo badnaantu waa wax awood qiimo badan u leh ilmaha. Waalidkuna siday arrintaas xoog u saari karaan waa iyagoo mar walba si is leh ilmohooda ugula hadla afkooda hooyo, dhaqankoodana tusa oo bara. Afka Finnishka iyo dhaqanka Finnishka carruurtu waxay ku baranayaan meelaha guriga ka baxsan oo ah xannaano maalmeedka iyo iskuulka.

➤ Taageerada dhaqaale ee qoysaska carruurta leh la siiyo

- Caawimada hooyonimada (Äitiysavustus) waxaa la siiyaa hooyo walba oo Finland deggan, oo intaanay uurka bishiisa afraad dhammaan ka hor baaritaanka caafimaadka ku martay rugta daryeelka hooyada iyo dhallaanka (neuvola), ama dhakhtar u tagtay. Hooyadu caawimada waxay u qaadan kartaa lacag ahaan ama iyadoo ah baakad hooyonimo oo alaab ku jirto (äitiyspakkaus). Baakadda hooyonimo waxaa ku jira dharka uu ilmaha yar ee dhashay u baahan yahay iyo qalabka daryeelka ilmaha loogu baahan yahay.
- Lacag maalmeedka waalidka (vanhempainpäiväraha) waxaa la siiyaa waalidka ilmaha guriga ku haya inta lagu jiro ilmaha tobankiisa bilood ee ugu horeeya. Lacag maalmeedku waxay ka kooban tahay lacagta hooyonimada, lacagta aabbanimada iyo lacagta waalidka. Lacagahaas caddadkay noqonayaan waxay ku xiran yihiin dakhliga mushaharka ah ee qofka soo geli jirey. Waalidka aan shaqayn jirin waxaa la siiyaa caddadka ugu yar ee lacag maalmeedka.
- Qoysaska carruurta leh kharashka ka baxa waxaa laga caawiyaa iyadoo la siiyo lacagta carruurta (lapsilisä), lacagtaas oo ay qoysku bil walba ku qaataan ilmo walba oo 17 sano ka yar oo si joogto ah Finland u deggan.

➤ Goormuu ilmuhu helaa dhalashada Finland

Ilmuhu markuu dhasho wuxuu dhalashada Finland helaa, haddii • ilmuhu markuu dhasho hooyadu leedahay dhalashada Finland • ilmaha aabbihii leeyahay dhalashada Finland, uuna qabo ilmaha hooyadii oo ajnebi ah • ilmaha aabbihii dhintay, isagoo ay ilmaha hooyadii isqabaan, lehna dhalashada Finland • ilmuhu Finland ku dhasho, oo markuu dhasho aanu helin waddan kale dhalashadiisa

➤ Gudniinka gabdhaha lama ogola

Siduu sharciga Finland dhigayo waa dembi, in sababo diin ahaaneed ama sababo kale dartood loo gumaado xubnaha taranka ee gabdhaha iyo dumarka. Sidaas haddii la sameeyo waxaa lagu mutaysan karaa sannado badan oo ciqaab xabsi ah.

➤ Gudniinka wiilasha

In wiilsha la gudaa Finland mabnuuc kama aha. Hase yeeshee gudniinka waa in mar walba lagu sameeyaa meel xaaladeedu tahay inay jirto aqoon ku filan oo cilmiga caafimaadka ah, leh nadaafad iyo waxyaabaha xanuunka khafiifiya.

Ka taageeridda dhibaatooyinka qoyska iyo dhallinyarada

Waddanka Finland markay jiraan dhibaatooyin qofka ama qoyska haysta, waxaa jira taageero dhinacyo badan ah oo dhibaatada lagu xalliyo. Degmadu adeegyada ay bixiso isticimaalidoodu waa lacag la'aan, aamminaad bayna leeyihiin oo cid aan shaqo ku lahayn looma sheego.

Qofka awoodiisa iyo hababka uu isticimaalaa kuma filaan karaan mar walba, inuu xal u helo dhibaatooyinka haysta isaga iyo qofka ay isqabaan, dhibaatooyinka carruurta qoyska, khilaafyadiisa ama dadka kale dhibaatooyinkooda. Dhibaatooyinka aan la xallin waxay keenaan inay xaaladu sii xumaato. Sidaas darteed waxaa fiican in aan dib loo dhigin in lala xiriiro adeegyada degmada. Waxaa kaloo taageero laga helaa ururada ay dadka waddanka u soo guurey leeyihiin iyo ururada kale ee ka jira degmada uu qofku deggan yahay.

Iskhilaafyada ka dhexeeya dadka xiriirka leh iyo iskhilaafyada nolosha qoyska

Rugaha la talinta qoysasku (Perheneuvolat) waxay dadka ka caawiyaan dhibaatooyinka la xiriira dadka xiriirkooda, nolosha qoyska iyo barbaarinta carruurta. Waa lacag la'aan, aamminaad buuxda ayeyna leedahay dhexdhexaadinta ay degmadu qabanqaabiso ee lagu dhexdhexaadiyo arrimaha qoyska dhexdiisa ka jira.

Waddan iyo dhaqan cusub la qabsashadoodu waxay qofka ku noqon kartaa waayoaragnimo nafsad ahaan culays u keeneysa. Waxaa kaloo dhici karta in rafaadka uu qofku waddankiisii kula soo kulmay iyo xaaladda ay ku sugan yihiin dadka uu meeshaas kaga yimi ee ah waalidkiis, gabdhaha walaalihiis ah, wiilasha walaalihiis ah iyo qaraabada kale, ay ku hayaan welwel, murugo iyo niyadjab. Markaas oo kale waxaa wanaagsan inuu qofku la xiriiro meelaha laga helo adeegyada daryeelka caafimaadka maskaxda ee degmadu leedahay. Meelahaasi waxay dadka siiyaan daryeel iyo talooyin ku saabsan dhibaatooyinka la xiriira caafimaadka maskaxda.

Xarunta SOS ee dhibaatada degdegga ah (SOS Center – Crisis prevention for foreigners) waxay u adeegtaa dadka Finland deggan ee ah dadka waddanka u soo guurey iyo qoysaskooda. Helsinki xarunta ku taallaa waxay dadka siisaa caawimo xagga nafsadda ah iyo taageero xaaladaha dhibaatooyinka leh. Ururka caafimaadka maskaxda ee koonfur galbeed ee Finland oo Turku ku yaalla ayaa dhibaatada degdegga ah caawimadeeda siiya dadka waddanka u soo guurey.

Dadka qaxootiga ah ee lagu soo sameeyey jirdilka iyo ehelkooda waxaa lagu caawiyaa oo lagu daryeelaa Xarunta baxnaaninta dadka jirdilka lagu sameeeyey (Kidutettujen kuntoutuskeskus). Xaruntu waxay ku taallaa Helsinki. Xarunta baxnaaninta waxaa macaamiil ka noqon kara dadka si ay baxnaanin u helaan, ay xarunta daryeelka caafimaadka ee degmadoodu soo gudbisey ama uu soo gudbiyey dhakhtar ka shaqeeya rug dhakhtar oo birifaati ah. Sidoo kale Oulu waxaa ka furan laan bixisa adeegyada baxnaaninta ee loogu talagalay dadka jirdilka lagu sameeyey.

Dhibaatooyinka carruurta iyo dhallinyarada waa in wax laga qabtaa

Carruurta iyo dhallinyaradu si dhakhso ah ayey ula qabsaadaan dhaqanka cusub. Caadooyin cusub bay ka bartaan saaxiibadood iyo markay iskuulka joogaan. Waxaana dhici karta inay waalidka ku adkaato inay caadooyinkaas cusub fahmaan.

Waxaa dhici karta in sidii la isula qabadsiin lahaa dhaqanka qoyska iyo caadooyinka cusub ee ay carruurtu barteen ay keento in qoyska dhexdiisa iskhilaaf ka dhasho.

Waxaa kaloo dhici karta inay carruurta iyo dhallinyaradu dareemaan dhibitaanno ay la kulmaan, markay joogaan meelaha guriga bannaanka ka ah ama iskuulka. Iskuul dhigashaduna ay dhib ku noqoto.

Waxaa wanaagsan in dhibaatadu xitaa hadday yar tahay isla markiiba wax laga qabto. Waxaa wanaagsan in marka hore lala xiriiro macallinka iskuulka ama shaqaalaha xannaanada. Dhibaatooyinka aad bay u sii badan karaan, haddii aan wax laga qaban.

Hadday jiraan dhibaatooyin carruurta iyo dhallinyarada ah waxaa caawimo laga dalban karaa degmada la deggan yahay rugteeda la talinta qoysaska iyo xafiiska caafimaadka maskaxda.

Haddii dilitaan lagu sameeyo qofka xaaska la isu yahay ama carruurta, booliska ayaa dacwo loo gudbiyaa

Dilitaanka lagu sameeyo qofka xaaska la isu yahay ama carruurta waa dilitaan qoys. Dilitaanka lagu samaynayo dadka isku qoyska la yahay, iskiis isagama joogsado ee wuu ka sii daraa. Marka loo dhaqmo si dagaallan leh, lama dhihi karo caadooyinka dhaqankayaga ayaa sidaas ah oo difaac lagama dhigan karo. Siduu sharciga Finland dhigayo, dilitaanka lagu sameeyo qof qoyska ka tirsan waa dembi..

Waxaa wanaagsan in qofka dilitaanka lagu sameeyey uu booliska dacwo u gudbiyo, una tago dhakhtar si baaritaan loogu sameeyo.

Dagaalka lagu samaynayo qofka xaaska la isu yahay ama carruurta, wuxuu noqon karaa dilitaan jir ahaaneed ama dagaal nafsad ahaaneed ama dhaqaale ahaaneed ama dagaal wasmo ahaaneed. Siduu sharciga Finland dhigayo, lama ogola in carruurta jir ahaan loo ciqaabo.

Degmooyinka waaweyn waxaa ku yaalla guryo ammaanka ah (turvakoti) oo caawiya dadka dhibanayaasha ah ee dilitaanka lagu sameeyey. Dadka degmooyinka kale deggan xitaa way imaan

karaan guryahaas ammaanka.

Waxaa kaloo caawimo laga helaa degmada la deggan yahay xafiiskeeda sooshalka, xarunteeda caafimaadka, xafiiskeeda caafimaadka maskaxda iyo rugteeda la talinta qoysaska. Dagaalllanka qoyska dhexdiisa ka jira waxaa kaloo loo sheegi karaa shaqaalaha rugta daryeelka hooyada iyo dhallaanka. Shaqaalaha dowlada waxaa waajib ku ah inay qofka caawiyaan.

Qofka dilitaanka samaynayaa isna caawimo ayuu u baahan yahay. Shaqaalaha degmada iyo aqoonyahannada ku takhasusay caawinta dadka dilitaanka sameeya ayaa caawiya dadka raba inay dilitaanka ay samaynayaan iyo sida dagaallanka leh ee ay u dhaqmayaan ka gudbaan.

Guryaha ammaanka ee loogu talagalay dadka qoyskoodu dagaalka ku sameeyo

Guriga ammaanka waxaa tegi kara qof walba oo qoyskiisa kala kulma dilitaan. Markay jirto xaalad dhibaato iyo mushkilad degdeg ah, toos baa loo aadi karaa guriga ammaanka. Guriga ammaanka waxaa kaloo lagula xiriiri karaa telefoon ama iyadoo xafiiska sooshalka la sii marayo.

Qofka waalidka ah iyo carruurtu guriga ammaanka ayey si ku meelgaar ah u deggenaan karaan, hadday u suuroobi weydo ama ay khatar u tahay inay gurigooda joogaan dilitaan ama hanjabaad ama cabsi darteed.

Shaqaalaha guriga ammaanka ayaa si wadajir ah looga wadafekeri karaa sidii xal loogu heli lahaa dhibaatooyinka jira iyo sidii loo heli lahaa hab lagu joojiyo dagaallanka socda. Qofka macaamiisha ah isagaa go'aanka gaara. Guryaha ammaanka iyo telefoonadooda la soo waco markay dhibaato jirto way furan yihiin afar iyo labaatanka saacba. Degmooyinku waxay kaloo leeyihiin guryo badbaadinta iyo dhibaatooyinka degdega ah markay jiraan loogu talagalay (kriisi- ja turva-asunnot).

Waa mabnuuc inuu qofku kufsado qofka ay isqabaan

Siduu sharciga Finland dhigayo, kufsashadu waa dembi. Xitaa waxaa dembi ah in qofka la isqabo la kufsado. Qofka kufsashada lagu sameeyaa waa inuu isla markuu dembigu dhacaba la xiriiraa booliska una tagaa dhakhtar.

Qofka dembiga lagu sameeyey, isagu ma sababin kufsashada, mana aha inuu ceeb dareemo. Qofka kufsashada lagu sameeyey dhibaatooyinka kufsashada ka soo gaartey dartood wuxuu taageero ka raadsan karaa degmada uu deggen yahay shaqaalaheeda dowladda.

Helsinki waxaa ku taalla Tukinainen oo ah xarun waddanka oo dhan u adeegta oo dadka kufsashada lagu sameeyey ka caawisa dhibaatooyinka hore. Xarunta waxaa la yiraahdaa (raiskauskriisikeskus Tukinainen).

Looma baahna in shaqaalaha dowladda loo sheego sababaha la isu furayo

Guurku waa heshiis uu qofku u madaxbannaan yahay. Waana laga noqon karaa. Haddii la dareemo in wada noolaanshuhu aanu suuragal ahayn, markaas waa in laga fekeraa in la isfuro. Waddanka Finland qofka furiin waa loo ogolaan karaa, xitaa iyadoo qofka ay isfurayaan uu furiinka ka soo horjeedo. Marka la isfurayo shaqaalaha dowladda looma sheego sababaha keenay furiinka iyo labada qof ee isqaba xiriirada ka dhexeeya. Marka go'aan laga gaarayo waxyaabaha carruurta khuseeya, ninka iyo naagtu way siman yihiin.

Labada qof ee isqaba midkii doona ayaa furiinka dalban kara. Furiinka waxaa la dalbadaa iyadoo codsiga furiinka loo gudbinayo maxakamadda degmada ee qaabilsan deegaan uu qofku deggen yahay. Caawiye sharciyaqaan ah oo ka socda xafiiska dowlada ee ka caawinta arrimaha maxakamadaha (Valtion oikeusaputoimiston jul¬kinen oikeusavustaja) ayaa dadka ka caawiya sida codsiga loo sameeyo iyo waxyaabaha xuquuqda ah ee la xiriira furiinka.

Marka la isfurayo ayaa go'aan laga gaaraa sidii loo qaybsan lahaa guriga iyo hantida kale. Haddii qoysku carruur leeyahay, waa in marka la isfurayo go'aan laga gaaraa arrinta ku saabsan masuul ka noqoshada sharci ahaaneed ee carruurta.

Furiinka ka dib masuul ka noqoshada carruurta

Qofka masuulka ka ah ilmaha, xilka saarani waa inuu masuul ka noqdo siduu ilmuhu u heli lahaa wanaag nololeed, barbaarin iyo horumar dheellitiran. Masuul noqoshada (Huoltajuus) macneheedu waa inuu qofku xaq u leeyahay inuu ilmaha daryeelo oo isagu gaaro go'aamada ilmaha khuseeya.

Marka loo tegayo shaqaalaha maamulka dowlada iyo arrimaha maxakamadaha, qofka

masuulka ah ayaa ilmaha metela, haddii loo baahdo. Qofka ilmaha masuulka ka ah oo keliya ayaa baasaboorkiisa lagu qori karaa ilmaha.

Marka la isfuro labada waalid mid ka mid ah si otomaatig ah looguma magacaabo inuu ilmaha masuul ka yahay. Marka go'aanka laga gaarayo arrinta ku saabsan masuul ka noqoshada ilmaha, ilmaha hooyadii iyo aabbihii way siman yihiin. Waalidku waxay kaloo ku heshiin karaan, inay ilmaha si wadajir ah masuul uga wada ahaadaan.

Hadday suuragal tahay waalidku iyagaa dhexdoodda toos uga heshiin kara waxyaabaha ku saabsan ilmaha daryeelkiisa iyo meesha uu deggenaanayo. Heshiiskaas waxaa lagu ansixin karaa xafiiska sooshalka.

Haddii masuul ka noqoshada carruurta si kale looga heshiin kari waayo, maxakamadda ayaa go'aan ka gaaraysa. Go'aanka ay maxakamaddu gaareyso nooca uu noqonayo waxaa saamayn ku yeesha danta ilmuhu siday ku jirto iyo warbixinta ay shaqaalaha sooshalku soo qoraan ee ku saabsan xaaladda waalidka.

Isfuritaanka waalidku waa arrin dhib ku ah ilmaha. Ilmuhuna xaq buu u leeyahay inuu furitaanka ka dib xitaa daryeel ka helo labadiisa waalidba.

Masuul ka wada noqoshadu (Yhteishuoltajuus) waa mid u baahan inay labada waalid awoodaan inay wada shaqayn yeeshaan, xitaa haddii uu iyaga dhexdooda yaallo iskhilaafyo. Haddii aanay jirin waxyaabihii loo baahnaa si ilmaha masuul looga wada noqdo, markaas waxaa la samayn karaa in laga noqdo masuul ka wada noqoshadii, oo labada waalid midkood laga dhigo inuu keligiis masuul ka noqdo ilmaha.

Ilmaha xuquuqdiisa la kulanka iyo waajibaadka masruufka

Ilmuhu xaq buu u leeyahay, inay sii socdaan xiriirada fiican ee nabadgelyada leh ee uu la leeyahay hooyadii iyo aabbihii. Labada waalid waa inay si wadajir ah xil isaga saaraan, siduu ilmuhu si ku filan ugu tagi lahaa oo ula kulmi lahaa waalidka aanu la deggeneyn. La kulanka waalidka kale waa mid uu ilmuhu xaq u leeyahay, qofka la isfurayna ilmaha uma diidi karo inuu waalidkiisa kale la kulmo.

Labada waalidba waxaa waajib ku ah inay xil iska saaraan ilmaha masruufkiisa. Haddii labada waalid aanay isla deggeneyn, ilmuhu waalidka aanu la deggeneyn wuxuu xaq ugu leeyahay caawimo masruuf.

Caawimada masruufku caddadka ay noqonayso waxaa lagu ansixiyaa heshiis lagu galo xafiiska ilaalinta arrimaha carruurta (lastenvalvojan luona), ama go'aan ay maxakamaddu gaarto. Haddii qofka ay waajibka ku tahay aanu awoodin inuu bixiyo caddadka caawimada masruufka ee lagu heshiiyey, ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu degmadiisa ka helo taageerada masruufka. Degmada xafiiskeeda ilaalinta arrimaha carruurta iyo shaqaaleheeda sooshalka ayaa laga helaa faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan jagada uu ilmuhu leeyahay, markay waalidku isfuraan ka dib.

Marka la isfuro sida hantida loo qaybsado

Marka la isfuro ka dib sida hantida loo qaybsanayo waxaa saamayn ku leh waddanka sharcigiisa la isticimaalayo.

Haddii sharciga Finland la isticimaalo, furiinka ka dib sida caadiga ah hantida oo dhan si is le'eg ayaa loogu qaybiyaa labada qof ee isfuray.

Labada qof ee isqabaa waxay hantidooda u qaybsan karaa si waafaqsan heshiiskooda. Haddii sida hantida loo qaybsanayo la isku afgaranwaayo, maxakamadda ayaa qof looyar ah u magacaabi karta inuu arrinta xal u raadiyo.

Heshiiska shuruudda ee guurku (avioehtosopimus) wuxuu suuragal ka dhigi karaa in hantida loo qaybsado si aan isle'ekayn. Labada qof isqabaa intaanay isguursan ka hor ama iyagoo isqaba ayey geli karaan heshiiska shuruudda ee guurka.

Heshiiska shuruudda ee guurka ayaa lagu heshiin karaa, in haddii la isfuro labada qof mid waliba qaadanayo hantida heshiiska ku qoran ee lagu heshiiyey inuu qaato. Heshiiska shuruudda ee guurku wuxuu kaloo sida hantida loo qaybsanayo saamayn ku yeeshaa, haddii labada qof ee isqaba midkood dhinto.

Heshiisku waa inuu ahaada mid qoraal ah. Waa muhiim, in xafiiska dowlada ee ka caawinta arrimaha maxakamadaha ama qof looyar ah laga codsado caawimo ah, sida loo sameeyo heshiiska. Heshiiska shuruudda ee guurka (avioehtosopimus) waa in laga diwaangeliyaa maxakamadda degmada (käräjäoikeus) ee qaabilsan deegaanka qofku deggan yahay.

Inta badan noocyada kala duduwan ee dagaal samayntu iyagoo wada socda ayey dhacaan

- Dagaal samaynta jir ahaaneed tusaale ahaan waxaa ka mid ah, wax ku dhufasho, kala tuurid, haraatiyid iyo ceejinta.
- Dagaal samaynta nafsad ahaaneed waa baadid (kiristäminen), hanjabaad, cambaarayn, liidid, yasid, cabsigelin iyo weliba xadidaada la xadiday qofka socodkiisa ama xiriirka saaxiibtinimada iyo qaraabada oo xadidaad lagu samaynayo.
- Dagaal samaynta dhaqaale waa marka qofka la isqabo loo diido inuu shaqaysto ama lacag la'aan laga dhigo.
- Dagaal samaynta wasmada leh waa marka isagoo aan raalli ka ahayn qofka loo taataabto si wasmo leh, ama wasmo lagu khasbo ama la kufsado.

Siduu furiinku u saamaynayo sharciga waddanka lagu joogo

1. Haddii sharciga deggenaanshaha waddanku yahay nooca joogtada ah (pysyvä oleskelulupa), labada qof ee isqaba ama sidii wax isqaba oo kale u wada nool furiinkoodu saamayn kuma yeelanayo sharciga deggenaanshaha.
2. Haddii sharciga deggenaanshaha waddanku yahay mid wakhti ku eg (määräaikainen oleskelulupa), qof walba arrintiisa gaar baa looga fekeraayaa, in sharciga loo sii cusboonaysiiyo iyo in laga qaado.
3. Qofka ajnebiga ah qofkay isqabi jireen dalabkiisa dartiis shaqaalaha dowladu ugama qaadaan sharciga deggenaanshaha, codsigiisa cusubna kama gaaraan go'aan diidmo ah.
4. Haddii sababta keentay in labada qof xiriirkoodu dhammaado ay tahay mid aan ku xirnayn qofka ajnebiga ah, tusaale ahaan qofka kale oo ah mid dagaal sameeya darteed, iyadoo qof walba arrintiisa gaarkeeda loo fiiranayo ayaa sabab ka feker ahaan ah darteed qofka loogu ogolaan karaa sharci deggenaansho. Dacwada isla markiiba la gudbiyo iyo caddaymaha dhakhtarku waxay muujiyaan dhibaatooyinka guurka ka jira iyo sababaha furiinka keenay.
5. Qofka ajnebiga ah ee sabab xiriir qoys ahaaneed loogu ogolaaday sharciga deggenaanshaha oo wakhti go'an ku eg, markuu xiriirkii qoys ahaaneed dhammaado ka dib waxaa qofka sharci deggenaansho oo cusub loogu ogolaan karaa, haddii qofku xiriir adag ku leeyahay Finland. Tusaale ahaan haddii qofka ajnebiga ah uur leedahay ama uu qofku ilmo ku leeyahay Finland, ama uu Finland ka shaqeeyo ama wax ka barto, waa loo ogolaan karaa sharci deggenaansho, xitaa qofkay isqabeen iyagoo isfuray.

Furiinka waxaa laga dalbadaa maxakamadda degmada

DOORASHADA 1	Labada qof ee isqabaa si wadajir ah bay maxakamadda degmada uga dalbanayaan furiin oo codsiga furiinka waxay u gudbinayaan maxakamadda degmada, ama midkood baa keligiis furiinka dalbanaya oo codsiga furiinka samaynaya.	Markay sidan jirto labada qof ee isqabaa waa inay codsiga ka dib sugaan lix bilood oo ah wakhtiga ka fekerka (harkinta-aika).	Furiinka waxaa la ogolaan karaa, haddii markay lixda bilood dhammaadaan labada qof ee isqabaa weli labadooduba ama midkood rabo furiinka, oo maxakamadda degmada u gudbiyaan codsi cusub.
DOORASHADA 2	Labada qof ee isqabaa islama aanay deggeneyn labadii sano ee ugu dambeeyey	Markay sidan jirto labada qof ee isqabaa si wadajir ah bay maxakamadda degmada uga dalbanayaan furiin oo codsiga furiinka ayey u gudbinayaan maxakamadda degmada ama midkood baa keligiis dalbanaya furiinka oo codsiga furiinka u gudbinaya maxakamadda degmada.	Isla markiiba waa loo ogolaan karaa furiinka.

➤ Mabnuucidda u soo dhawaanshaha ayaa badbaadisa

Mabnuucidda u soo dhawaanshaha waxa loola dan leeyahay waa si loo badbaadiyo qof naftiisa, caafimaadkiisa, xornimadiisa iyo ammaankiisa, ayaa qof kale loo diidaa inuu la soo xiriiro qofka la badbaadinayo. Qofku markuu soo codsado ayey shaqaalaha dowladu sameeyaan xukunka ah mabnuucidda u soo dhawaanshaha. Si loo xukumo mabnuucidda u soo dhawaanshaha, khasab ma aha in qofka lagu xukumayaa yahay mid dagaal sameeyey.

Mabnuucidda u soo dhawaanshaha waxaa la dalban karaa tusaale ahaan, haddii habdhaqan hanjabaad leh lagala kulmo qof qaraabo ah, qof hore la isu qabi jirey ama qof la isla deggen yahay. Xitaa waa la dalban karaa in qof isku dheri la yahay lagu xukumo mabnuucidda u soo dhawaanshaha, markaas waxay noqonaysaa in qofka lagu xukumay mabnuucidda u soo dhawaanshaha aanu imaan guriga la wada deggenaa.

➤ Adeegyada caafimaadka maskaxda ee degmada ayaa caawiya qofka niyadjabku hayo

Qofka niyadjabku hayo siyaabo badan oo kala duduwan ayey uga muuqan karaan astaamaha cilladaha cudurku. Astaanta cilladda cudurku waxay noqon kartaa tusaale ahaan daal, cillad xagga hurdada ah, xanaaq dhawaan, awood daro ah inuusan waxba qabsan oo arrimaha samayn. Astaamaha cilladdu waxay kaloo noqon kartaan kuwo ah cillado jir ahaaneed tusaale ahaan. xanuun iyo kaar, aanay jirin cudur kale oo jir ahaaneed oo sabab u ah. Adeegyada caafimaadka maskaxda ee degmada ayaa caawiya qofka niyadjabku hayo.

➤ Maxay tahay in la sameeyo dilitaanka ama kufsashada ka dib

- Xusuus ahaan u qoro dadka markhaatiga noqon kara magacyadooda iyo meelaha lagala soo xiriiri karo
- Dembiga dacwo ka gee oo booliska u sheeg
- Dhakhtar u tag oo ka codso inuu kuu qoro caddayn muujinaysa dhaawacyada ama waxyaabaha ku soo gaarey
- Kufsashada ka dib ha isdhiqin, dharkana ha iska beddelin

Marka la isfuro waxaa laga heshiiyaa waxyaabaha carruurta ku saabsan

DOORASHADA 1

MASUUL KA WADA NOQOSHO

Masuul ka wada noqoshada labada waalid ilmaha way wada barbaariyaan, waxyaabaha ilmaha ku saabsana way ka wada heshiiyaan, xitaa iyagoo isfuray. Sida caadiga waxaa jira waxyaabo badan oo uu go'aan ka gaaro waalidka uu ilmuhu la nool yahay. Hase yeeshee waalidka kale ogolaanshihiisa waxaa loo baahan yahay markay jiraan tusaale ahaan go'aamo ku saabsan

- guuritaanka uu ilmuhu ka guurayo magaaladii ama degmadii uu degenaa (gaar ahaan hadduu ilmuhu u guurayo waddan kale)
- u ogolaanshaha baasaboorka Finland
- waxyaabaha daryeelka caafimaadka ah ee la samaynayo
- ka beddelidda magaca ama diinta
- iskuulka
- isticimaalka ilmaha hantidiisa

DOORASHADA 2

MASUULIYAD KELI AHAANEED

Qofka ilmaha masuulka ka ah oo ah labada waalid midkood ayaa keligiis haya ilmaha, isagaana keligiis go'aan ka gaaraa waxyaabaha ku saabsan ilmaha.

Waxbarashada iyo nolosha shaqada

Aqoonta luuqadda Finnishka ama luuqadda Iswiidhishka iyo in wax la barto oo shahaado la qaato waxay sii kordhinayaan fursadda uu qofku shaqo ku heli karo. Waxbarashada aasaasiga ah lacag la'aan bay u tahay qof walba. Sidoo kale waxaa iyana guud ahaan lacag la'aan ah waxbarasho xirfadeedka iyo waxbarashada aqoonta guud ee ka dambeeya waxbarashada heerka aasaasiga ah, laakiin qofku waa inuu isagu iska bixiyaa kharashka ku baxa buugta daabacan ee wax laga barto, waxaana dhici karta in cuntadu lacag tahay. Waxbarashadu si isle'eg bay suuragal ugu tahay dumarka iyo raggaba.

Waxbarashada loogu talagalay dadka waddanka u soo guurey

Degmooyin badan baa laga qabanqaabiyaa waxbarashada la qabsashada waddanka ee loogu talagalay dadka waddanka u soo guurey. Waxbarashada waxaa lagu bartaa luuqadda Finnishka ama Iswiidhishka, waxaa wax laga ogaadaa bulshada, waxaa la helaa hagitaan la xiriira waxbarashada iyo nolosha shaqada, waxaana la soo arkaa oo wax laga ogaadaa nolosha shaqada ee Finland.

Waxbarashada la qabsashada waddanka mooyee waxaa kaloo jirta in macadyo badan ay qabanqaabiyaan koorsooyin loogu talagalay dadka waddanka u soo guurey oo lagu barto luuqadda Finnishka ama Iswiidhishka. Aqoonta luuqadda iyo in dadka la isbarto oo tusaale ahaan la isku barto meelaha hiwaayadaha (harrastus) ama meelaha ururada shacabka, waxay fududeeyaan la qabsashada waddanka.

Waxbarashada qofka loo qorshaynayo waxaa sal u noqda oo la fiiriyaa waxbarashada uu ku soo qaatay waddankan dibediisa iyo waayo aragnimada shaqo ee uu leeyahay. Maamulka Waxbarashada (Opetushallitus) iyo goobaha wax laga barto (oppilaitokset) ayaa laga helaa faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan sida waxbarashada looga sii wadan karo Finland iyo sida Finland looga aqoonsanayo shahaadooyinka waxbarasho ee laga soo qaatay waddanka laga yimi.

Noocyo waxbarasho ee dadka waaweyn loogu talagalay

Dumarka iyo ragga iyagoo qaangaar ah waddan kale ka soo guura oo Finland u soo guura waxay haddii loo baahdo samayn karaan waxbarashada dugsiga hoose/dhexe iyo waxbarashada dugsiga sare. Markaas iyadoo la shaqaynayo ayaa waxbarashada waxaa lagu qaataa dugsiga sare ee dadka waaweyn ama macadka qaranka (kansanopisto). Qofka waddanka u soo guurey xarumaha waxbarasho xirfadeedyada ee dadka waaweyn (ammatilliset aikuiskoulutuskeskukset) ayuu xirfad ku baran karaa ama ka sii buuxsan karaa shahaadadiisii hore waxbarashadeeda.

Qofku wuxuu xirfad ku baran karaa isagoo wax ku baranaya nidaamka heshiiska waxbarasho (oppisopimus). Waxbarashadu waxay isugu jirtaa shaqo qabasho iyo wakhtiyo wax la baranayo. Shaqada la qabanayo mushahar baa qofka lagu siiyaa.

Dadka shaqa la'aanta ah ee shaqa raadiska ah waxaa loo qabanqaabiyaa koorsooyin wakhtiyada ay socdaan kala duduwan yihiin oo xafiiska shaqadu bixiyo. Koorsooyinka waxaa laga dalbadaa xafiiska shaqada.

Waddanka Finland sida caadiga ah meesha shaqada rag iyo dumarba way ka shaqeeyaan. Sidoo kale dumarka iyo raggu waxay qabtaan shaqooyin isku mid ah. Waana isku mid waxyaabaha saameeya ee ah xuquuqda, waajibaadka iyo fursadaha. Sharciga Finland

ayaa mabnuucaya in goobta shaqada qofka lagu takooro iyadoo ay sabab u tahay tusaale ahaan rag ama dumar midkuu yahay, ama midabka jirkiisa ama diintiisa darteed.

Xafiiska shaqada iyo xoogsashada ayaa dadka ka caawiya siday shaqo u heli lahaayeen

Xafiiska shaqada iyo xoogsashada ayaa dadka ka caawiya siday shaqo u heli lahaayeen. Qofku markuu Finland yimaado, waxaa fiican inuu si dhakhso ah isaga diwaangeliyo xafiiska shaqada iyo xoogsashada. Lacagta shaqa la'aanta looma ogolaado, haddii aanu qofku tegin oo iska diwaangelin xafiiska shaqada iyo xoogsashada ee degmadiisa. Xafiiska waxaa laga helaa wararka ku saabsan shaqooyinka banaan iyo wararka ku saabsan fursadaha tababar shaqo iyo waxbarasho. Sida ugu fiican ee shaqa raadinta loogu guuleysan karaa waa, inuu qofku isdiraa oo isagu la xiriiraa shaqabixiyayaasha.

Waxyaabaha la sameeyo wakhtiyada firaaqada ah waa muhiim

Samaynta wax hiwaayad ah (harrastustoiminta) waa hab sahlan oo lagu dhexgeli karo dadka Finnishka ah, luuqadana lagu baran karo. Finland waxaa jira fursado badan oo qofka u suuragelinaya inuu wax hiwaayad ah sameeyo oo ka qaybqaato tusaale ahaan hawlaha iskaa wax u qabsada ah ama waxqabadka urur shacabka.

Ururada ay dadka waddanka u soo guurey leeyihiin iyo meelaha ay ku kulmaan dadka dhaqamada kala duduwan ayuu qofku tegi karaa oo dhaqankiisa ku ilaashan karaa, dad cusubna kula kulmi karaa. Shaqada iskaa wax u qabsashada ah iyo shaqada ururada shacabku waxay qofka u suuragelinayaan inuu aqoontiisa iyo xirfadiisa ilaashado oo horumar ku sii sameeyo. Xitaa waxaa dhici karto inay taasi mustaqbalka macno weyn ku yeelato siduu qofku u shaqaaloobi lahaa. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan fursadaha hiwaayadaha ee ka jira qofka degmadiisa waxaa laga helaa tusaale ahaan degmada xafiisyadeeda dhaqanka iyo wakhtiyada firaaqada ah (kunnan kulttuuri- ja vapaa-aikatoimistot), ururada shacabka (järjestöt) iyo ururada (yhdistykset) iyo weliba ogeysiisyada ku qoran joornaalka degmada ka soo baxa.

Caawimo waa loo helaa dhibaatooyinka dhaqaale

Sida caadiga ah Finland dumarka iyo ragguba iyagaa shaqaysta oo masruufa naftooda iyo qoyskooda. Bulshada Finland waxay sidoo kale sugtaa inay dadka shaqa la'aanta ah, waayeelka, naafada iyo dadka jirran helaan dhaqaale ay ku noolaadaan. Waxyaabo ay ka mid yihiin lacagta canshuur ahaanta la isaga qaado ayaa loo isticimaalaa, in la caawiyo dadka kor lagu soo sheegay.

Daryeelka bulshadu (sosiaaliturva) wuxuu ku salaysan yahay in Finland la deggen yahay. Marka laga reebo xaalado gaar ah mooyee, qof walba oo si joogto ah Finland u deggen wuxuu xaq u leeyahay faa'iidooyinka dhaqaale ee ay Hay'adda Hawlgabka Qaranku (KELA) ogolaato.

Lacagta caawimada noloshu (toimeentulotuki) waa taageerada dhaqaale ee ugu dambaynta la dalbado. Qofku wuxuu lacagta caawimada nolosha xaq u leeyahay, haddii dhaqaale nolosha ugu filan aanu ka soo gelin shaqada ama si kale u helin. Lacagta caawimada nolosha caddadkeedu wuxuu ku xiran yahay qofka codsaday dakhliga soo gala iyo hantida uu leeyahay. Lacagta caawimada nolosha waxaa ogolaada xafiiska sooshalka.

Waa mabnuuc in qofka la takooro oo shaqada laga eryo uur ama fasaxa qoyska dartiis

Siduu sharciga Finland dhigayo, shaqabixiyuhu markuu shaqaale qaadanayo qofka uma takoori karo uur ama fasaxa qoyska dartiis. Fasaxyada qoysku waa fasaxa hooyonimada, fasaxa aabbanimada, fasaxa waalidka iyo fasaxa haynta ilmaha. Sidoo kale sababahaas dartood qofka shaqaalaha ah shaqada looga eryi karo ama looma xadidi karo heshiiskiisa shaqadu intuu soconayo. Fasaxyada qoyska ka dib sida caadiga ah qofka shaqaalaha ah wuxuu xaq u leeyahay inuu dib ugu soo noqdo shaqadii uu qaban jirey.

Deegaanka badbaadada shaqadu wuxuu ilaaliyaa siday xaaladaha shaqadu yihiin

Sideeda deegaan ee ah deegaanada badbaadada shaqada ee Finland ka jira shaqadoodu waa inay ilaaliyaan oo suuragal ka dhigaan, inay xaaladaha lagu shaqeeyaa ahaadaan kuwo nabadgelyo leh, caafimaad leh, ayna yihiin kuwo kor u qaadaya awooda shaqo.

Taageerada dhaqaale ee la heli karo marka qofka hawshiisa guud tahay waxbarasho

Ardayda waxbarashadooda ku tiigsanaya xirfad waxay dalban karaan lacagta waxbarashada (opintotuki) iyo lacagta caawimada ijaarka ee ardayda (asumistuki), lacagaas oo ah kuwo ardayga u suuragelinaya inuu waxbarashadiisa si buuxda ugu soo jeesto. Lacagta waxbarashada waxaa heli kara dadka si joogto ah Finland u deggan ee ajnebiga ah, dadka qaxootiga ah iyo xubnaha qoysaskooda iyo dadka dib u soo guurid darteed Finland ugu soo guurey. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan lacagta waxbarashada (opintotuki) iyo lacagta caawimada ijaarka ee ardayda (asumistuki) waxaa laga helaa Hay'adda Hawlgabka Qaranka (KELA) xafiisyadeeda. Ardaygu wuxuu kaloo dalban karaa deynka waxbarashada (opintolaina).

Heshiiska shaqada oo qoraal ah iyo ku biiridda ururka xirfadda

Intaan shaqada la bilaabin ka hor ayaa la sameeyaa heshiis shaqo oo qoraal ah oo ka dhexeeya qofka shaqaalaha ah iyo shaqabixiyaha. Heshiiska waxaa lagu muujiyaa mushaharka iyo waxyaabo ay ka mid yihiin wakhtiga shaqada. Qofka shaqaalaha ah wuu u madaxbanaan yahay inuu ku biiro ururka xirfadda (ammattiliitto) ee qaabilsan nooca shaqada ee uu qabto. Ururku wuxuu dadka xubnaha ka ah kala taliyaa waxyaabaha la xiriira mushaharka, wakhtiga shaqada iyo waxyaabaha kale ee shuruudaha shaqada ah. Qofku dadka ay isla shaqeeyaan ayuu si sahlan uga hubsan karaan ururka xirfadda ee qaabilsan nooca shaqada ee uu qabto. Waddanka Finland waa wax caadi ah in laga tirsanaado urur xirfadeed (ammattiliitto).

Naagta iyo ninkuba mid waliba mushaharka uu shaqaysto waa hanti uu shakhsi ahaan u leeyahay. Sida caadiga ah shaqabixiyuhu wuxuu qofka shaqaalaha ah mushaharka ugu soo shubaa akownka bangiga ee qofka shaqaalaha ah soo sheego ee uu shakhsi ahaan u leeyahay. Qofku bangiga uu doono ayuu akown ka furan karaa. Marka akown la furanayana waxaa loo baahan yahay kaar aqoonsi ama baasaboor aan dhicin.

Mushaharka waa in canshuur laga bixiyaa

Qof walba oo shaqaale ah oo Finland deggan dhaqaalaha uu shaqaysto ee soo gala wuxuu canshuur ka siiyaa qaranka dowlada iyo degmada uu ka tirsan yahay. Dadka dhaqaalaha badan soo galo canshuurta ay bixiyaan way ka badan tahay tan ay bixiyaan dadka dhaqaalaha yar soo galo. Shaqabixiyaha ayaa qofka shaqaalaha ah ka gooya canshuur waafaqsan sida ku qoran kaarka canshuurta ee qofka shaqaalaha ah leeyahay, ka dibna shuba. Markuu heshiiska shaqadu bilowdo, qofka shaqaalaha ah waa inuu kaarkiisa canshuurta u keenaa shaqabixiyaha. Kaarka canshuurta waxaa laga soo samaystaa xafiiska canshuuraha ee qaabilsan degmada uu qofku deggan yahay.

Heshiiska shaqada waxaa shaqabixiyaha qabta shuruudaha ugu yaryar ee jira

Siduu sharciga Finland dhigayo shaqabixiyaha waxaa xagga mushaharka, fasaxa mushaharka leh ee shaqada ka urura iyo xagga wakhtiga shaqadaba qabta shuruudaha ugu yaryar ee jira.

➤ Qorshaha la qabsashada waddanka ayaa caawiya sidii loo shaqaaloobi lahaa, sugana inuu qofku helo dhaqaale uu ku noolaado

Haddii qofka Finland u soo guurey uu heli waayo shaqo ama boos waxbarasho, ama ay noqoto inuu ka maarmi waayo lacagta caawimada nolosha, xafiiska shaqada iyo xoogshada ama xafiiska sooshalka ayaa qofka loogu samayn karaa qorshe la yiraahdo qorshaha la qabsashada waddanka (kotoutumissuunnitelma). Ujeedada qorshaha laga leeyahay waa in la caawiyo siday dadka waddanka u soo guurey u shaqaaloobi lahaayeen iyo siday ula qabsan lahaayeen bulshada Finland. Qorshuhu wuxuu inta badan ka kooban yahay waxbarashada luuqadda Finnishka, sii buuxsashada waxbarasho xirfadeedka iyo shaqobarasho. Muddada uu qofka waddanka u soo guurey ku jiro inuu qorshihiisa la qabsashada waddanka fuliyo, dhaqaalaha uu ku noolaan lahaa waa la sugaa oo wuxuu dhaqaale ahaan helaa taageerada la qabshada waddanka.

➤ Si loo shaqaysto waxaa loo baahan yahay sharciga lagu shaqaysan karo

Marka laga reebo kuwo dhowr ah oo sida caadiga ah ka duwan mooye, sideeda kale dadka waddanka u soo guurey si ay Finland uga shaqaystaan waxay u baahan yihiin sharci lagu shaqaysan karo. Sharciga lagu shaqaysto (työlupa) waxaa bixiya Xafiiska arrimaha u soo guuridda waddanka (Maahanmuuttovirasto).

➤ Shaqaysashadu waxay sii fiicnaysaa lacagta hawlgabka

Dakhliga mushaharka ee shaqada laga helaa wuxuu saamayn ku yeeshee xaaladda madaxbanaanta dhaqaale ee markuu qofku galo hawlgabka. Finland da'da guud ahaan hawlgabka lagu galo waa 65 sano. Mushaharku intuu le'eg yahay ayaa saamayn ku yeelata intuu noqonayo caddadka hawlgabka ee qofka loo soo shubo bil walba.

➤ Waa in laga taxaderaa marka heshiisyada la saxiixayo

Heshiisyada qoraalka ah intaan la saxiixin ka hor waa in la fahmaa waxa heshiiska ku qoran macnahooda. Tani waxay khusaysaa heshiiska shaqada iyo heshiisyada kale. Heshiisyada qoraalka ah waa in siday yihiin loogu dhaqmaa. Haddii aqoontaada luuqadu aanay kugu filnayn, waxaa lagugula talinayaa inaad turjubaan isticimaasho. Sharciga Finland wuxuu dhigayaa, in haddii shuruudaha heshiiska loo arko inay yihiin kuwo aan caqli gal ahayn, markaas maxakamadda ayaa gaari karta go'aan lagu baabi'inayo heshiiska.

➤ Caawimo ah arrimaha maxakamadaha

Waddanka Finland caawimada arrimaha maxakamadda oo dhan waxaa laga helaa xafiisyada dowlada ee ka caawinta arrimaha maxakamadaha (valtion oikeusaputoimistot), qareemada (asianajajat) iyo looyarada kale (muut lakimiehet). Dadka dhaqaalahoodu liito waxaa suuragal u ah, inay ka caawin arrimaha maxakamadda oo lacag la'aan ah ka helaan xafiisyada dowlada ee ka caawinta arrimaha maxakamadaha..

Ka ganacsiga dadka

Ka ganacsiga dadku wuxuu Finland ka yahay dembi ciqaabtiisu aad u daran tahay.

Dhibanayaasha ka ganacsiga dadka lagu sameeyaa waxay noqon karaan dumar, rag ama carruur. Ka ganacsiga dadka waxaa la isku dayaa in qofka dhibanaha ah looga faa'iideyso si wasmo ahaan ah iyo / ama si dhaqaale ahaan ah. Inta badan waxaa jira deyn qofka dhibanaha ah uu isku deyayo inuu shaqo ahaan ama dhillaysasho ahaan iskaga bixiyo.

Dadka sameeya ka ganacsiga dadku waxay isku dayaan inay qofka dhibanaha ah kontoroolaan, tusaale ahaan waxay xadidaan dhibanaha xornimadiisa socodka, way u hanjabaan, cadaadis bay ku sameeyaan ama waxay isticimaalaa dagaal nafsad ahaaneed iyo /ama jir ahaaneed. Waxaa xitaa dhici karta in dhibanaha ehelkiisa loo hanjabo. Inta badan ka ganacsiga dadku waa waxqabad ay qabanqaabiyaan kooxaha dembiilayaasha ah ee habaysan. Hase yeeshee dembiga ka ganacsiga dadka waxaa kaloo iyana geli kara qofka dhibanaha ah ehelkiisa ama dad uu yaqaan.

Qofka ah dhibanaha ka ganacsiga dadka wuxuu xaq u leeyahay caawimada uu bixiyo nidaamka caawinta dhibanayaasha ka ganacsiga dadka (ihmiskaupan uhrien auttamisjärjestelmä), caawimada waa: qabanqaabin deegaan, taageer dhaqaalaha nolosha, adeegyada caafimaadka iyo arrimaha bulshada, talooyin arrimaha maxakamadaha ah iyo caawimo arrimaha maxakamadaha ah, qabanqaabin ammaan iyo sharci degenaansho oo shuruudo ku xiran, haddii dhibanuhu sharci daro ku joogo Finland.

➤ Caawimada dhibanaha ka ganacsiga dadka

Xerada Qaxootiga ee Joutseno (Joutsenon vastaanottokeskus) tel. 071 876 3170
Ururka Dumarka ee Monika (Monika-Naiset liitto) tel. (09) 692 2304
Heeganka dhibanaha loo geystey dembiga (Rikosuhripäivystys), www.riku.fi
Booliska, lambarka markay dhib degdeg ah timaado (Hätänumero), tel. 112

Hay'adaha dowlada ee muhiimka ah

Markaad hay'adaha dowlada dan ka leedahay, marka ugu horaysa waxaad la xiriirtaa hay'adaha dowlada ee degmada aad deggan tahay ku yaalla. Hadday arrintaadu kuu hagaagi weydo, waxaad la xiriirtaa hay'adaha dowlada ee waddanka oo dhan qaabilsan.

XAFIISKA ARRIMAHA U SOO GUURIDDA WADDANKA

www.migri.fi
Lautatarhankatu 10, 00580 HELSINKI
Wax su'aalidda guud (Yleistiedustelut)
Tel. 071 873 3400
Isniin-Jimce, saacadda 9-15

IN TO

www.intofinland.fi
E-mail: info@intofinland
Salomonkatu 17, albaabka A-porras, dabaqa 2aad
PL 82, 00601 Helsinki
In To waa laan adeegga ah oo ay wada leeyihiin Hay'adda Hawlgabka Qaranka (Kela) iyo Maamulka canshuuraha, waxaana loogu talagalay inay u adeegto shaqaalaha Finland imaanaya.

HAY'ADDA HAWLGABKA QARANKA (KELA)

www.kela.fi
Hay'adda Hawlgabka Qaranka oo loo yaqaan Kela, waxay qaabilsan tahay dadka Finland deggan dhaqaalahooda badbaadadooda bulshada oo ah marka lagu jiro xaaladaha kala duduwan ee nolosha.

XAFIISKA WAKIILKA SINAANTA

www.tasa-arvo.fi
Tel. (09) 160 73248
Wakiilka sinaantu wuxuu ilaaliyaa ku dhaqanka sharciga loo dejiyey sinaanta dumarka iyo ragga.

XAFIISKA SHAQADA IYO XOOGSASHADA

www.mol.fi

XAFIISKA DOWLADA EE KA CAAWINTA ARRIMAHA MAXAKAMADAHA

www.oikeus.fi

HAGIDDA CAAWIMADA ARRIMAHA MAXAKAMADAHA

Tel. 0100 86200 meeshii caawimada ayuu u gudbiyaa Caawimada arrimaha maxakamadda dartood, dowladu waxay leedahay xafiisyada ka caawinta arrimaha maxakamadaha. Qofka sharciyaqaanka looyarka ah ee ka shaqeeya xafiiska dowlada ee ka caawinta arrimaha maxakamadda jagadiisa shaqo magaceedu waa caawiyaha dowliga ah ee arrimaha maxakamadaha (julkinen oikeusavustaja).

XAFIISKA WAKIILKA DADKA LAGA TIRADA BADAN YAHAY

www.ofm.fi
E-mail:ofm@ofm.fi
Tel. 071 878 0171
Xafiiska wakiilka dadka laga tirada badan yahay wuxuu hiigsanayaa waa inuu ka hortago takooridda ku salaysan asalka uu qofku ka soo jeedo, xafiisku wuxuu sii kordhiyaa xiriirada fiican ee asallada laga soo jeedo, wuxuuna sugaa inay dadka asal ahaan tirada yar iyo dadka ajnebiga ah helaa xuquuqdooda, wuxuuna ilaaliyaa inuu fulo nidaamka ah in aanay dhici takoorid qof loo takoorayo asalka uu ka soo jeedo dartiis.

Ururada shacabka iyo adeegyada taageeridda

TELEFOON WADDANKA OO DHAN AH OO CAAWIYA DADKA LA KULMA KA GANACSIGA DADKA

Tel. 071 876 3170
Xerada Qaxootiga ee Joutseno (Joutsenon vastaanottokeskus)

XARUNTA BAXNAANINTA DADKA JIRDILKA LAGU SAMEEYEY

Hay'adda Diakinissa ee Helsinki
(Helsingin Diakonissalaitos)
www.hdl.fi
Mäkelänkatu 58-60, dabaqa 4aad, 00510 Helsinki
Tel. (09) 7750 4584, maalmaha shaqada, saacadaha 8.30-15.00

URURKA CAAFIMAADKA MASKAXDA EE KOONFURTA GALBEED EE FINLAND

Adeegyada loogu talagalay dadka waddanka u soo guurey ee ah adeegyada dhibaatooyinka u baahan in degdeg wax looga qabto
(Kriisipalvelut maahanmuuttajille)
www.turunkriisikeskus.fi
Yliopistokatu 12 a B, 20100 TURKU
Tel. (02) 2333442
Meesha adeegyada dhibaatooyinka u baahan in degdeg wax looga qabto waxaa lagu caawiyaa dadka macaamiisha ah ee ay haysato xaalad dhibaato oo la xiriirta nolosha caafimaadka maskaxda iyo nolosha arrin bulsho ahaan oo u baahan in degdeg wax looga qabto. Caawimada dhibaatada degdegga ah oo si aqoonyahanimo ah qofka loo siiyo nooca ay tahay waa mid hagaajin ah, taageero siin ah, arrintana lagu ogaanayo.

URURKA DUMARKA EE MONIKA

ururku wuxuu bixiyaa oo horumariyaa adeegyada loogu talagalay dadka waddanka u soo guurey ee ah dumarka iyo gabdhaha iyo carruurta ee la kulmay dagaal uu ku sameeyey qof ay xiriir xaas ahaan leeyihiin ama qof ay xiriir dhow leeyihiin.
www.monikanaiset.fi/
Ururka Dumarka ee Monika (Monika-Naiset liitto ry)
Kinaporinkatu 2 E 40, 00500 Helsinki, Tel. (09) 7279 9999
E-mail: info@monikanaiset.fi
Telefoonka heeganka ee waddanka oo dhan lambarkiisu waa (09) 692 2304

LAANTA ADEEGYADA BAXNAANINTA DADKA JIRDILKA LAGU SAMEEYEY EE OULU

Hay'adda Diakonissa ee Oulu (Oulun Diakonissalaitos)
www.odl.fi
Isokatu 19 A 8, 90100 OULU
Tel.(08) 3132692
Macaamiil waxaa ka ah dadka waddankoodii kula soo kulmay jirdil ee ah qaxootiga, kuwa magangelyada codsaday iyo ehelkooda u dhow. Daryeelku wuxuu ku salaysan yahay qofka macaamiisha ah xaaladiisa oo dhinac walba leh oo la qiimeeyo, daryeelkana waxaa loo fuliyaa si la tashi leh oo aqoonyahanno xirfado badan ah leh

GOOBTA TAAGEERADDA PRO

www.pro-tukipiste.fi
Pro-tukipiste Helsinki
Vilhonkatu 4 B 20, Helsinki
E-mail: toimisto@pro-tukipiste.fi
Tel. (09) 726 2877

GOOBTA TAAGEERADDA PRO TAMPERE

Aleksis Kiven katu 10 E, Tampere
Tel. (03) 3454 2200
Ururku wuxuu soo saaraa adeegyo lagu horumarinayo dadka shaqada wasmada ka qaybqaata caafimaadkooda, ammaankooda iyo nolol wanaagooda.

TUKINAINEN OO AH HEEGANKA CAAWIYA DADKA KUFSASHADA LAGU SAMEEYEY

www.tukinainen.fi
Tel. 0800-97895

HEEGANKA CAAWIYA DADKA DEMBIGA LAGU SAMEEYEY

Telefoon caawiya,
www.riku.fi/fi/etusivu/
Tel. 0203 16116
Heeganka caawiya dadka dembiga lagu sameeyey shaqadiisa aasaasiga ah waa in la sii fiicnaysiiyo jagada ay leeyihiin qofka dembiga lagu sameeyey iyo ehelkiisa iyo qofka markhaatiga ka ah arrin dembi. Adeegyada intooda badan waxaa la fuliyaa iyadoo si aqoonyahannimo ah loo hagayo, loona samaynayo si iskaa wax u qabso ah.

XARUNTA SOS EE KA HORTAGGA DHIBAATOOYINKA EE AJNEBIGA

www.tukinet.net
SOS Center – Crisis prevention for foreigners
Tel. (09) 4135 0501, maalmaha shaqada (weekdays) 9-15
Xarunta SOS (SOS-keskus)
Maistraatinportti 4 A, dabaqa 4aad, 00240 Helsinki
Xarunta SOS ee Ururka caafimaadka maskaxda ee Finland (Suomen Mielenterveysseuran SOS-keskus)
waxay bixisaa caawimo xagga nafsadda ah iyo taageero loogu talagalay markay jiraan xaalado dhibaato ah oo u baahan in degdeg wax looga qabto. Qofku hadduu rabo isagoon magaciisa sheegin ayuu heli karaa taageero.

Ilaha wararka laga soo xigto

WWW.INFOPANKKI.FI
Bangiga wararka (Infopankki) boggagiisa waxaa ku qoran macluumaad aasaasi ah oo loogu talagalay dadka waddanka u soo guurey. Macluumaadkaas aasaasiga ah wuxuu ku saabsan yahay siday bulshadu u shaqayso iyo fursadaha Finland ka jira. Macluumaadku wuxuu ku qoran yahay luuqado badan oo ah luuqadaha ay dadka waddanka u soo guurey isticimaalaan.

Somali 2010

SISÄASIAINMINISTERIÖ

WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA
PL 26, 00023 VALTIONEUVOSTO
www.intermin.fi

VÄHEMMISTÖVALTUUTETTU

WAKIILKA DADKA LAGA TIRADA
BADAN YAHAY
PL 26, 00023 VALTIONEUVOSTO
www.ofm.fi

TASA-ARVOVALTUUTETUN TOIMISTO

XAFIISKA WAKIILKA SINAANTA
PL 33, 00023 VALTIONEUVOSTO
www.tasa-arvo.fi